

## Casharka 25

1. Yaa daafacay Yacquub oo isaga si nabad ah dib uga keenay dhulkii Haaraan, oo ku soo celiyey Kancaan?  
-Ilaah.
2. Muxuu ahaa magacii wiilkii Yacquub ugu jeclaa wiilashiisa?  
-Yuusuf.
3. Maaddaama Yacquub wiilkiisii Yuusuf ka jeclaa walaaliuhjiis, maxay kuwii kale u arkeen Yuusuf?  
-Way ka masyareen Yuusuf, oo aad u nebcaadeen.
4. Maxay ahayd riyadii kowaad ee Ilaah tusay Yuusuf?  
-Xidhmooyinkii badarka ahaa ee walaalihiis ayaa u sujuuday xidhmooyinkii badarka ahaa ee Yuusuf.
5. Maxay ahayd riyadii labaad ee Yuusuf?  
-Wuxuu ku arkay, qorraxda, dayaxa, iyo kow-iyo-toban xiddigood oo isaga u sujuudaya.
6. Maxay labada riyaba ka macne ahaayeen?  
-Midi waxay ka macne tahay in Ilaah Yuusuf ka dhigi doono mid sharaf leh, oo qoyskiisuna ay isaga u sujuudi doonaan.
7. Yaa garanayey mustaqbalkii Yuusuf, oo ka dhex tusay mustaqbalkooda riyada?  
-Ilaah.
8. Markii Yuusuf u yimid inuu soo booqdo walaalihiis, markii ay duurka joogeen, maxay walaaladiis sameeyeen?  
-Marka kowaad, waxay ka siibeen qamiiskiisii, isagiina ceel bay

ku dhex tuureen.

-Dabadeetana, waxay addoon ahaan uga iibiyeen beec-mushtarkii dadka ka ganacsan jiray.

9. Halkee bay ganacsada dadka Keeneen Yuusuf?

-Masar.

10. Kuma ayuu ahaa kii ganacsatadu ay Yuusuf addoon ahaan uga iibiyeen?

-Waxaa la oran jiray Footiira.

11. Maxaa dhacay markii Yuusuf Footiifar gurigiisa ka shaqaynayey?

-Pootiifar xaaskiisa ayaa been ka sheegtay Yuusuf, oo Footiifarna xabsi baa la dhigay.

-Miyaa Ilaah illoobay Yuusuf?

-Maya.

-Ilaah cidna ma illoobo.

-Yuusuf wuxuu ku jiraa Xabsi isagoo jooga dhulkii Masar.

-Magaca boqorka Masar xukumayey wakhtigaasna wuxuu ahaa Fircoon.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa waxaa Ilaah riyo tusay boqorkii dalka Masar.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 41:1-4

1-Markii laba sannadood oo dhammu dhamaatay ayuu

Fircoon riyooday, oo wuxuu is-arkay isagoo webiga ag taagan.

2-Oo bal eeg, waxaa webigii ka soo baxay toddoba sac oo qurqurxan oo shilshilis, oo waxay daaqeen cawskii dareemada ahaa.

3-Markaasaa waxaa dabadood webigii ka soo baxay toddoba sac oo kale oo fool xun, oo weydsan, oo waxay is-ag taageen sicihii kale oo webiga qarqiisa jooga.

4-Markaasaa sicihii foosha xumaa oo weydsanaa waxay cuneen toddobadii sac oo quruxsanayd oo shishishlayd. Kolkaasuu Fircoon toosay.

-Yaa riyada u muujiyey Fircoon?

-Ilaah.

-Maxay ahayd riyada Ilaah tusay Fircoon?

-Toddoba sac oo caata ah oo cunaya toddoba sac oo buurbuuran.

-Isla habeenkaas, Ilaah wuxuu siiyey fircoon, riyadii labaad.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 41:5-8

5-Markaasuu haddana seexda oo mar labaad riyooday oo wuxuu arkay toddobada sabuul oo buurbuuran oo wanwanaagsan oo ka soo baxay isku jirid.

6-Oo bal eeg, waxaa haddana ka soo daba xaxay toddoba sabuul oo xunxun, oo ay dabayshii bari qallajisay,

7-Markaasaa sabuulladii xunxumaa waxay liqeen toddobadii sabuul oo buurburnayd oo il tirnayd. Markaasuu Fircoon toosay, oo wuxuu arkay inay riyo tahay.

8-Oo subaxdiina wuu dhibaataysnaa, kolkaasuu u cid diray oo u u wada yeedhay saaxiriintii Masar oo dhan iyo nimankii

xigmadda lahaa oo dhan; markaasaa Fircoon u sheegay riyadiisii; laakiin ma jirin mid Fircoon u fasiri kara.

-Maxay ku saabsanayd riyadii labaad ee Ilaah tusay Fircoon?

-Waxay ahayd toddoba sabuul oo xunxun oo liqaya toddoba sabuul oo wanaagsan.

-Fircoon wuxuu ahaa boqorkii dalka Masar, laakiin Fircoon ma uusan rumaysnayn Ilaah.

-Fircoon iyo dadkiisuba waxay caabudi jireen qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha.

-Fircoon iyo dadkiisa waxay caabudi jireen raha, xayawaanka kale, iyo weliba webiga dhulkooda ku yiil.

-Inkastoo Fircoon aanu Ilaah rumaysnayn, miyaa Ilaah awooday inuu Fircoon ku hago wixii uu Isaga Ilaaha ahu doonayo?

-Haa.

-Ilaah waa kan keliya, oo wuxuu awoodaa inuu dadka ku hago doonistiisa.

-Maadaama Ilaah uu kaamil yahay, haddaba, wax waliba ee Ilaah sameeyo waa kaamil.

-Dadka xigmadda leh ee Masar ma ayan garanaynin fasirka riyoooyinka Fircoon.

-Qof baase Fircoon u sheegay in Yuusuf garan karo fasirka riyadii

Fircoon.

-Markii taasu dhacday ayaa Fircoon Yuusuf uga yeeray xabsiga.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 41:14-16

14-Dabadeedna Fircoon baa u cid diray oo u yeedhay Yuusuf. Markaasay dhaqso uga soo bixiyeen godxabsigii; kolkaasuu xiirtay, oo dharkiisii bedeshay, oo uu u soo galay Fircoon.

15-Markaasaa Fircoon wuxuu Yuusuf ku yidhi, Riyaan ku riyooday, mana jiro mid fasiri karaa; oo waxaan maqlay in markii aad riyo maqashid aad fasiri kartid.

16-Yuusufna Fircoon buu u jawaabay oo ku yidhi, Taasu xaggayga ma aha, laakiinse Ilaah wuxuu Fircoon siin doonaa jawaab nabadeed.

-Yuusuf wuxuu garanayey inaanu awood u lahayn in isagu qudhiisu uu fasiro riyada Fircoon.

-Balse Yuuse wuxuu kaloo garanayey in Ilaah awoodo inuu garto riyada oo uu fahmo macnaha riyadii Fircoon.

-Maaddaama Yuusuf rumaysnaa Ilaah, ayaa Ilaah u muujiyey Yuusuf, macnaha riyadii Fircoon.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 41:25-32

25-Oo Yuusuf wuxuu ku yidhi, Fircoon, Riyadaadu waa mid, oo waxaa Ilaah samaynayo ayuu kuu sheegay, Fircoonow.

26-Toddobada sac oo wanwanaagsanau waa toddoba sannadood, toddobada sabuul oo wan wanaagsannuna waa toddoba

sannadood, riyadu waa mid.

27-Toddobada sac oo weydsan oo foosha xun, oo ka soo daba baxay waa toddoba sannadood, oo haddana toddobada sabuul oo madhan, oo dabayshii bari qallajisay waxay noqon doonaan toddoba sannadood oo abaar ah.

28-Taasu waa wixii aan kugula hadlay, Fircoonow. Waxaa Ilaah samaynayo ayuu ku tusay.

29-Oo bal eeg, waxaa dalka Masar oo dhan imanaya toddoba sannadood oo barwaaqo ah.

30-Oo dabadoodna waxaa dhici doona toddoba sannadood oo abaar ah; oo barwaaqadii oodhanna waa laga illoobi doonaa dalka Masar, markaasay abaartu dhulka dhammayn ddoontaa.

31-Barwaaqadana dhulka laguma ogaan doono abaartaas ka dambaysa aawadeed, waayo, waxay noqon doontaa mid aad u xun.

32-Oo taas aawadeed riyadii labanlaab bay kuu noqotay, Fircoonow, maxaa yeelay, waxaas waxaa amray Ilaah, oo weliba Ilaah dhowaan buu samayn doonaa.

-Yuu ahaa kii Yuusuf siiyey garashada riyadii Fircoon?

-Ilaah.

-Maxaa lagu macneeyey labadii riyo ee Fircoon?

-Toddobada sannadood ee wanaagsan ayaa waxaa liqaya toddoba sannadood oo abaar ah.

-Markaa wuxuu Yuusuf soo hor-dhigay Fircoon qorshe wanaagsan oo toddobada sannadood oo aaranka ah looga gudbayo toddobadii sannadood ee abaarta ahayd.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 41:33-36

33-Haddaba Fircoonow, waxaad oontaa nin calqi iyo xigmad leh, oo ka sarraysii dalka Masar ood han.

34-Tan yeel oo waxaad doorataa niman dalka u sarreeya, oo waxa toddobada sannadood oo barwaaqada ah dhulka ka baxa inta shanaad ha ururiyeen.

35-Oo cuntada ood han sannadahan wanwanaagsan oo imanaya ha ururiyeen, hadhuuhdkana ha kugu hoos kaydiyeen, Fircoonow, oo intay cunto ahaan magaalooyinka u dhigaan, ha ilaaliyeen.

36-Cuntaduna kayd bay dalka uga noqon doontaa toddobada sannadood oo abaarta ah oo ka dhici doonta dalka Masar, si aan dalku abaarta ugu baabi'in.

-Yuusuf wuxuu ku talinayaa in Fircoon magacaabo qof badarka aruuriya, oo wixii dadka ku filan mooyaane inta kale kaydiya, si dadku cunno u helaan sannadada abaarta ah.

-Maxaa haddaba Fircoon ay la ahayd in fikirka Yuusuf ahaa?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 41:37-40

37-Waxaasuna Fircoon way la wanaagsanaayeen, isaga iyo addoommadiisiiba.

38-Markaasaa Fircoon wuxuu addoommadiisii ku yidhi, Miyaynu heli karaynaa mid la mid ah kan, oo ah nin Ruuxa Ilaah ku jiro?

39-Markaasuu Fircoon wuxuu Yuusuf ku yidhi, Mar haddii Ilaah ku tusay waxyaalahan ood han, ma jiro mid sidaadoo kale caqli iyo xigmad u leh.

40-Adigu waxaad ka sarrayn doontaa gurigayga, dadkayga oo dhanna waxaa lagu xukumi doonaa si waafaqsan hadalkaaga, ooa nigu carshiga oo keliya ayaan kaaga weynaan doonaa."

-Fircoon wuxuu Yuusuf ka dhigay boqorkii dalka Masar.

-Inkastoo Yuusuf ay waaaladiis u iibiyeen addoon ahaan, haddana Ilaah ma tuurin Yuusuf.

-Sidee buu Ilaah ku kaamilay riyooyinkii Yuusuf, markii Yuusuf weli ilmo ahaa?

-Ilaah wuxuu Yuusuf ka dhigay boqorkii dhulka Masar.

-Ilaah wuxuu mar waliba sameeyaa wax kasta ee uu horey u qorshaystay.

-Ma jirto cid istaajin karta qorshayaasha Ilaah.

-Kaddib markii Fircoon uu boqor u magacaamay Yuusuf, ayaa Yuusuf bilaabay inuu kaydiyo badarkii ka hray in dadku ay cunaan sannaddadii wanaagsanaa.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 41:46-49

46-Yuusufna soddon sannadood buu jiray markuu hor istaagay Fircoon oo ahaa boqorkii Masar. Markaasaa Yuusuf Fircoon hortiiisii ka tegey, oo wuxuu wada maray dalkii Masar ood han.

47-Markaasaa toddobadii sannadood oo barwaaqada ahayd waxaa dhulkii ka soo baxay wax aad u badan.

48-Markaasuu ururiyey cuntadii toddobadii sannadood baxday oo dalka Masar ood han tiil, oo cuntadii wuxuu ku kaydiyey magaalooyinka. Cuntadii beerihii k wareegsanaa magaalo kastana isku meel buu ku kaydiyey.

49-Markaasaa Yuusuf hadhuudh aad u badan wuxuu u

kaydiyey sida camuudda badda, ilaa uu tirintii daayey, maxaa yeelay, waxaya hayd wax aan tiro lahayn.

-Toddobada sannadood ee wanaagsan, ayaa Yuusuf wuxuu kaydiyey badar ama haruur aan la tirin karin.

-Markii toddobadii sannadood ay dhammaadeen, waxaa bilowday toddoba sannadood oo abaar ah.

-Halkee bay haddaba jireen ama ku maqnaayeen Yuusuf walaaladiis iyo aabbihi?

-Waxay ku noolaayeen dhulkii Kancaan.

-Dhulkii kancaan, waxaa ka bilowday abaar, oo Yuusuf Aabbihiis iyo walaalihiis cuntadii way ka dhammaatay.

-Markaasaa waxaa hadlay Yacquub ooa haa Yuusuf Aabbihiis.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 42:1-5

1-Haddaba Yacquub wuxuu arkay in hadhuudh laga helo Masar, markaasuu Yacquub wiilashiisii ku yidhi, War maxaa midkiinba midka kale u fiirinayaa?

2-Oo wuxuu yidhi, Bal ogaada, waxaan maqlay in hadhuudh laga helo Masar. Bal xaggaas u dhaadhaca, oo halkaas wax inooga soo iibiya, inaynu noolaanno oo aynaan dhimanin.

3-Markaasaa Yuusuf tobankiisii walaal waxay u tageen masar inay hadhuudh ka soo iibsadaan.

4-Laakiinse Benyaamiin oo ahaa Yuusuf walaalkiis Yacquub ma uu raacinin walaalihiis; waayo, wuxuu is yidhi, Waaba intaasoo belaayo ku dhacdaa.

5-Markaasaa wiilashii Israa'iil waxay u yimaadeen inay wax iibsadaan, iyagoo la socda kuwii yimid, waayo, abaartu dalkii Kancaanna way ka dhacday.

-Yuusuf aabbihiis Yacquub wuxuu soo dirsaday wiilashiisii si ay dalkii Masar haruudh uga soo iibiyaan?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 42:6b-17

6-Markaasay Yuusuf walaalihiis u yimaadeen isagii, oo intay u wada sujuudeen ayay wejiga dhulka wada saareen.

7-Yuusufna walaalihiis wuu arkay, wuuna gartay, laakiin wuxuu isaga dhigay sidii nin qalaad, oo intuu si qallafsan ula hadlay ayuu wuxuu ku yidhi iyagii, War xaggee baad ka timaadeen? Oo iyana waxay yidhaahdeen, waxaannu ka nimid dalka Kancaan si aannu cunto u iibsanno.

8-Yuusufna wuu gartay walaalihiis laakiinse iyagu ma ay garan isagii.

9-Markaasaa Yuusuf xusuustay riyoooyinkii iyaga ku saabsanaa oo uu ku riyooday, oo wuxuu ku yidhi, iyagii, Basaasyaad tihiin, oo waxaad u timaadeen inaad aragtaan dhulka abaarnimadiisa.

10-Iyana waxay ku yidhaahdeen isagii, Maya, sayidkayagiiyow, laakiinse annagoo addoommadaada ah waxaannu u nimid inaannu cunto iibsanno.

11-Kulligayo isku nin wiilashiis baannu nahay, oo waxaannu nahay niman daacad ah, ooa nnagoo addoommadaada ah basaasyo ma nihin,

12-Oo isna wuxuu ku yidhi, iyagii, Maya, laakiinse waxaad u timaadeen inaad aragtaan dhulka abaarnimadiisa.

13-Iyana waxay yidhaahdeen, Annagoo ah addoommadaada waxaannu nahay laba iyo toban alaalo ah, oo waxaannu nahay nin

jooga dalka Kancaan wiilashiisii; oo bal eeg, kii noogu yaraa wuxuu maatna la joogaa aabbahayo, midna maba joogo.

14-Markaasuu Yuusuf iyagii ku yidhi, Taasu waa tii aan idinkula hadlay, anigoo leh, Basbaasyaad tihiin.

15-Haddaba tan baa laydinku tijaabin doonaa; nolosha Fircoon baan ku dhaartay inaydaan halkan ka tegi doonin, in walaalkiinnii yaraa halkan yimaado mooyaane.

16-Mid idinka mid ah dira, oo ha keeno walaalkiin, idinkuna waad xidhnaan doontaan, in la tijaabiyo hadalkiinna, bal inay runi idinku jirto iyo in kale, haddii kalese hubaal nolosha Fircoon baan ku dhaartay inaad basaasyo tihiin.

17-Markaasuu kulligood muddo saddex maalmood ah wada xabbisay.

-Yuusuf wuxuu gartay walaalihiis, laakiin walaalihiis ma ayan garanin Yuusuf.

-Maxaa Yuusuf sidan xun ugula macaamilooday walaaladiis oo uu xabsiga u dhigay?

-Yuusuf wuxuu doonayey in walaalihiis ka fikirnaan wixii ay isaga ku sameeyeen markii uu ilmaha ahaa.

-Saddex maalmood kaddib, Yuusuf wuxuu walaalihiis oo dhan ka sii daayey xabsiga hal mid maahane.

-Waa kan haddaba wixii Yuusuf ku yiri, walaalihiis.

Bal aynu idiin akhrinno Bilowgii 42:18-20

18-Kolkaasaa maalintii saddexaad Yuusuf iyagii ku yidhi, Tan yeela, oo waad noolaan doontaan, waayo, aniga Ilaah baan ka

cabsadaa.

19-Haddaad niman daacad ah tihiin, walaalihiinna midkood ha kuxidhnaado guriga xabsigiinna; laakiinse idinku taga, oo hadhuudh u geeya reerihiinna abaaraysan.

20-Walaakiinna idiinku wada yar ii keena; sidaasuu hadalkiinnu ku rumoobi doonaa, mana aad dhiman doontaan. Iyana sidii bay yeeleen.

-Yuusuf wuxuu walaalihii siiyey badar, oo wuxuu u fasaxay inay dib ugu noqdaan dhulkii Kancaan hal mid maahane.

-Wakhti yar dabadeed, badarkii Yuusuf siiyey walaaladiis ee ay dhulkoodii u qaateen wuu dhammaaday.

-Markaasina, Yuusuf Aabbihiis ayaa haddana wiilashiisii ku yiri, dib ugu noqday dhulka Masar, si badar kale aad u soo iibsataan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 43:1-5 & 11-15

1-Abaartuna dalka aad bay ugu xumayd.

2-Oo markii ay wada cuneen hadhuuhdkii ay Masr ka keeneen aaa aabbahood ku yidhi, Bal taga haddana, oo cunto yar inoo soo iibiya.

3-Markaasaa Yahuudah la hadlay isagii, oo wuxuu ku yidhi, Ninkii aad buu noogu digay, oo wuxuu nagu yidhi, Wejigayga ma aad arki doontaan in walaalkiin idinla jiro mooyaane.

4-Haddaad walaalkayo na raacisid, waannu dhaadhacaynaa oo cuntaannu kuu soo iibinaynaa.

5-Laakiinse haddaad isaga dirin, annagu dhaadhici mayno; waayo, ninkii wuxuu nagu yidhi, Wejigayga ma aad arki doontaan in walaalkiin idinla jiro mooyaane.

11-Markaasaa aabbahood Israa'iil wuxuu iyagii ku yidhi, Hadday haatan saas tahay, bal tan yeela, haddaba midhaha ugu fiican ood alka weelashiinna ku qaada, oo bal ninkii hadiyad ugu geeya, wuxoogaa beeyo ah, iyo wuxoogaa malab ah, iyo xawaash iyo mallmal, iyo lows iyo yicib.

12-Gacantiinnana lacag laban laab ah ku qaada, oo lacagii joonyadihiinna afkooda lagu soo celiyeyna haddana gacantiinna ku qaada, waayo, mindhaa waa la soo qaldamay.

13-Walaalkiinna kaxeeya, oo kaca, oo bal haddana ninkii u taga,

14-Oo Ilaaha Qaadirka ahu naxariis ha idinka siiyo ninka hortiisa, inuu idiin sii daayo walaalkiinnii kale iyo Benyaamiin. Oo haddaan carruurtaayda ka gablamoo, anaa gablamay.

15-Markaasaa nimankii waxay qaadeen hadiyaddii, lacag labalaab ahna gacantooday ku qaadeen, Benyaa-miinna way kaxeeyeen, wayna kaceen oo Masr tageen, oo waxay hor istaageen Yuusuf.

-Yuusuf walaaladiis waxay dib ugu soo noqdeen Masar.

-Markii ay Maar Yimaadeen, ayaa Yuusuf walaaladiis oodhan uu ku casumay gurigiisa.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 43:16-17

16-Oo markii Yuusuf arkay Benyaamiin oo iyaga la jira ayuu wiilkii gurigiisa ku yidhi, Nimanka guriga so geli, dabadeedna neef qal oo diyaari, waayo, duhurka nimanku anigay ila qadayn doonaan.

17-Markaasaa ninkii yeelay wixii Yuusuf ku amray; oo ninkii wuxuu nimankii soo geliyey gurigii Yuusuf.

-Markii Yuusuf iyo walaalihiis isku yimaadeen, ayaa Yuusuf qirtay inuu walaalkood ahaa.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 45:3-8

3-Markaasuu Yuusuf wuxuu walaalihiis ku yidhi, Yuusuf baan ahay, ee aabbahay weli manool yahay? Walaalihiisna way u jawaabi kari waayeen, waayo, aad bay ugu argaggexeen hortiisa.

4-Markaasaa Yuusuf wuxuu walaalihiis ku yidhi, Bal ii soo dhowaada, waan idin baryayaaye. Kolkaasay u soo dhowaadeen. markaasuu yidhi, Anigu waxaan ahay walaalkiin Yuusuf, kii aad ka iibiseen kuwii Masar tegayay.

5-Oo haatan ha caloolxumaanina, naftiinnana ha u cadhoonina iibiskii aad halkan iga iibiseen aawadiis; waayo, Ilaah wuxuu hortiin ii soo diray in nafa la badbaadiyo.

6-Waayo, labadan sannadood baa dhulku abaar ahaa, oo wlei waxaa hadhay shan sannadood, oo aan beer la fali doonin, waxna la goosan doonin.

7-Oo Ilaah wuxuu hortiin ii soo diray inuu dadkiinna qaar dhulka idiinku reebo, oo uu idiin badbaadiyo kuwo fara badan oo baxsada.

8-Haddaba sidaas daraaadeed idinka ma ahayn kii halkan ii soo diray, laakiinse wuxuu ahaa Ilaah; oo isagu Fircoon buu aabbe iiga dhigay iyo sayidkii dadka gurigiisa oodhan, iyo taliyihii dalka Masar oo dhan.

-Muxuu Yuusuf ku yiri walaalihiis?

-Yuusuf wuxuu yiri, Ilaah qudhiisa ayaa Isaga Yuusuf ah sii geeyey masar.

-Maaddaama ay abaari soo fool lahayd, ayaa Yuusuf wuxuu

walaaladiis weyddiistay inay ka yimaadaan dhulka Kancaan, oo ay Aabbaha iyo qoyska oodhan ay ku soo celiyaan dhulkii Masar.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 45:9-11

9-Dhaqsada, oo aabbahay u kacay, oo waxaad isaga ku tidhaahdaan, Wiilkaagii Yuusuf wuxuu kugu soo yidhi, Ilaah wuxuu iga dhigay sayidkii Masar oodhan, ee soo dhaadhac oo ii kaalay, hana raagin.

10-Oo waxaad degi doontaan dhulka la yidhaahdo Goshen, oo waad ii soodhowaan doontaa, adiga iyo carruurtaada, iyo carruurtaada carruurtooda, iyo adhigaaga iyo lo'daada, iyo waxa aad haysatid oo dhanba.

11-Oo halkaasaan kugu quudin doonaa; waayo, weli waxaa hadhay han sannadood oo abaar ah, waaba intaasoo aad gaajootaan, adiga iyo reerkaaga, iyo waxa aad haysatid oo dhammuba.

-Yuusuf walaaladiis waxay ku noqdeen haddana dhulkii Kancaan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 45:25-28

25-Markaasay Masar ka baxeen, oo ay yimaadeen dalkii Kancaan, oo waxay u yimaadeen aabbahood Yacquub.

26-Markaasay u sheegeen oo ku yidhaahdeen, Yuusuf weli waa nool yahay, oo wuxuu u taliyaa dalka Masar oodhan. Markaasuu taag darmaaday, waayo, wuu rumayan waayay iyagii.

27-Markaasay u sheegeen hadalkii Yuusuf kula hadlay oodhan, oo markuu arkay gaadhifardoodkii Yuusuf u soo diray in isaga lagu qaado ayaa aabbahood Yacquub ruuxiisii cusboonaaday.

28-Markaasaa Israa'iil wuxuu yidhi, Igu filan mar haddii

wiilkaygii Yuusuf weli nool yahay; haddaba waan tegi doonaa, oo waan arki doonaa isaga intaan dhiman.

-Marka ay sidan tahay, Yuusuf aabbihiis iyo walaalihiis waxay aadeen dhulkii Masar inay Yuusuf la noolaadaan aawadeed.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 46:5

5-Markaasaa Yacquub ka tegey Bi'ir Shebac, wiilashii Israa'iilna waxay aabbahood Yacquub, iyo dhallaankoodii, iyo dumarkoodiiba ku qaadeen gaadhifardoodkii Fircoon u soo diray in isaga lagu soo qaado.

-Xitaa haddii sannado badan laga joogo markii Ilaah ballan-qaad sameeyo, haddana weli wuxuu samaynayaa wixii uu ballan-qaaday.

-Wax kastoo Ilaah ballan-qaado wuu samaynayaa.